

Xeerka Maamulka 12 Nofember 1957, lr. 174 rep.

Wax ka baddalka dekereetada 18 Maajo 1956 lamba. 78.

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 “Dhismaha Xeerka Xukuumadda Soomaaliya”;

Marka uu arkay dekereetda 18 Maajo 1956, lamba. 78, “Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya

Marka uu arkay dekereetda 25 Febberaayo 1957, lamba. 18, ee lagu wareejiyay Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha iqtisaaska arrimaha ku saabsan ganacsiga dibadda iyo lacagaha iyo waaxda cusub ee laga abuuray isla Wasaaraddaas;

Marka uu garowsaday habboonaanta in in loo sameeyo nidaam cusub Wasaaradda Arrimaha lacagta;

Tala soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Lacagta;

Iyado la qadarinayo awoodda uu siinayo qod. 11 ee xeerka la soo xusay ee 7 Maajo 1956, lamba. 1.

WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Qaybinta Waaxaha Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha, ee lagu sheegay qod. 38 ee dekereetdada 18 Maajo 1956, lr.78, waxaa loo baddalay sidaan:

- 1) — Waaxda Warshadaha, Gaadidka iyo Isgaarsiinta;
- 2) — Waaxda Hawlaha Guud;
- 3) — Waaxda Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha;
- 4) — Waaxda Ganacsiga Gudaha, Dibadda iyo lacagaha.

Qod. 2

Falanqaynta u gaarka ah Waaxda Warshadaha, Gaadiidka iyo Isgaarsiinta, sida ku xusan qod. 39 ee dekereetdada 18 Maajo 1956, lamba. 78, sidaan ayaa loo addalay.

- hawlgallada warshadaha;
- farshaxanka;
- macdan qodista iyo wax soo saarka macdanta;
- gododka macdanta iyo cusbada;
- amaahda, bangiyada iyo keydka;
- machadyada caymisyada;
- culaysyada iyo cabbiryada;
- adeegyada dalxiiska;
- gaadiidka circa iyo dhulka;
- nawaaxiga badda iyo dadka badda;

- xeerka nidaamka shaqada dekedaha;
- qalabaynta dekedaha;
- nidaaminta hawlgalada dhaqaalaha;
- nalalka xeebaha iyo layrarka;
- adeegyada dayuurad-hagidda iyo markab soo xiridda;
- canshuurta baroosin-dhigidda iyo xuquuqda badaha;
- milkiyadda maraakiibta;
- diiwaanka guud ee baabuurta;
- adeegyada boostada, taararka iyo telefoonada;
- adeegyada raadyaha-taararka iyo raadyaha-telefoonada madaniga.

Wixii ku saabsan falanqaynta Diiwaanka Guud ee Baabuurta iyo midka ku saabsan injinernimada macdanta, waxaa laga dhisay isla Waxdaas adeegyada soo socda:

- Adeegga Diiwaanka Guud Baabuurta, Adeegga Injineernimda Macdanta.

Qod. 3

Waaxda Ganacsiga Gudaha, Dibadda iyo Lacagta waxay qabanaysaa falaqaynada soo socda:

- wax isdhaafsiga ganacsiga gudaha;
- carwooyinka iyo suuqada;
- wakaaladaha kaalmada ganacsiga;
- ganacsiga hilibha;
- dallaalnimada;
- wax yaabaha la filan karo;
- quudka iyo ilaalinta sicirka;
- diyaarinta iyo fulinta barnaamijyada wax is-dhaafsiga dibadda iyo dabbaqidida heshiisyada ganacsiga iyo heshiisyada lacagaha qalaad;
- miisaaniyadda ganacsiga iyo lacag-bixinada;
- xisaabta maaraynta lacagta;
- nidaaminta wax soo dejinta iyo wax dhoofinta;
- arrimaha ku xiran helitaanka Shillin Soomaaliga;
- arrimaha la xariira xadgudubka lacagaha iyo ganacsiga dibadda;
- arrimaha lacagaha quseeya dalxiiska, gaadiidka badda, caymisyada, ganacsiga guur-guura, kafaaladda, alaab qaadayaasha/soo saarayaasha, shaqooyinka, shaqo qof kale loo qabanayo, wax dhoofnada iyo carwooyinka, xawilaadda gudaha ama dibadda;
- ka qaybgalka soomaalida dhexdeeda iyo dibadda iyo dibadda Somaaliya dhexdeeda;
- qaababka wareejinta lacagaha ee warashadaha iyo urur-hantiyeedyada gudaha iyo dibadda;
- wax soo dejinta iyo wax dhoofinta ku-meelgaarka;
- lacagta qalaad ee dibadda wax looga soo gato (franco valuta);
- xisaabta laga furto bangi dibadda;
- arrimaha farsamada ee khuseeya wax is-dhaafsiga;

- magdhowga gaarka;
- socodka gaadiidka xaduudka;
- nidaamka bannaynta.

Muqdisho, 12 Nofember 1957.

P. Maamulaha
P. Franca

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Xaji Faarax Cali Cumar

Waa la hubiyay lana diiwaangaliyay – Diw. 6 – bogga lamba. 1.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**